



**Neighborhood Schools and Enrollment
Options Office**

P- 619.260-2410

F- 619.725-7311

www.sandiegounified.org

Taariikh:

Ku:

Warqadanu waxay idin ku wargelineysaa sida uu dhigeyo sharciga dawlada-dhexe ee ku saabsan Unsafe School Choice Option, in ardey kasta oo dugsiyada guud ee hoose, sare iyo kuwa gaarka (charter) ah oo dembi dhacay ay dhibaato ka soo gaadho in loo oggolaado dugsiyada nabadgeleyada iyo badbaadada leh ee hoose, sare ama kuwa gaarka ah ee ha'aayada waxabarashadda ee deegaanka.

Sida diiwaankeyagu sheegayo, ilmahaagu waxay dhibaato ka soo gaadhey dembi dugsiga dhexdiisa ka dhacay. Sidaas darteed, haddii aad rabtid inaad ilmaha dugsiga ka beddeshid waxaad xaq u leedahay inaad codsatid ikhtiyaariyada lagu siiyey ee halkan kore ku cad.

Fadlan foomka halkan ku dheggan soo buuxi, waxaadna ku soo celisaa dugsiga uu hada ilmahaagu dhigto ama Xafiiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah ee San Diego Unified School District, Neighborhood Schools and Enrollment Options Office, oo ciwaankiisu foomka ku qoran yahay. Haddii aad ku fekerasid inaad ilmahaaga dugsiga ka beddeshid, marka aad foomkaas hesho, Aniga ayaa kula soo xidhiidhi doona si aan kuugu sheego ikhtiyaariyada aad leedahay. Haddii aad arrimahaas wax su'aalo ah ka qabtid waxaad igala soo xidhiidhi kartaa telefoonka xafiiskeyga oo ah (619) 260-2410.

Si Xushmad leh,

Marceline Marques
Director
Maamulaha Xafiiska Isdiiwaangelinta Ikhtiyaariyada ah

Somali version: Victims of Violent Crimes Letter Attachment 1